

Oslo ku cusub

Qaybtan aanu u bixinay “Oslo ku cusub”, waxa ay xambaarsan tahay warbixin ku saabsan sida Oslo looga helo meel la lagu noolaado. Meelaha carruurta lagu xannaaneeyo (barnehage) iyo meelaha uu qofku caawimada ka heli karo haddii uu xanuunsado. Waxa aad wax ka ogaanaysaa arrimaha ku saabsan adeegga arrimaha bulshada iyo xuquuqda caymiska ee aad xaqa u leedahay (trygderettigheter). Waxa kale oo halkan lagaga hadlayaa ururada ku hawlan ka shaqaynta qaxootiga iyo dadka ajnebiga ah.

Oslo waxay u qaybsan tahay xaafado badan. Haddii aad doonayso in aad u baahan tahay in aad wax ka ogaato arrimaha ay ka mid yihiin guri, dugsii, xannaanada carruurta (barnehage), caafimaad iyo caawimo dhaqaale, waa in aad la xidhiidhaa xaafaddaada. Qaybaha af-norwejiga iyo ingiriisida ee bogga www.velkommenoslo.no ayaad ka helayaa cinwaanadda dhammaan xaafadaha Oslo.

Guri

Marka aad doonayso in aad guri hesho, waa in aad marka hore kala doorataa in aad doonayso in aad guri iibsato (gadato) iyo in aad doonayso in aad kiraysato (ijaarato). Haddii ay tahay markii kuugu horraysay ee aad guri doonayso, waxa caadi ah oo habboon in aad kiraysato guri horta. In guri la kiraytaa waa qaali, laakiin qiimaha guriga aad kiraysanaysaa waxa uu ku xidhan yahay xaafadda aad ka doonayso. Waxad guri toos uga kiraysan kartaa dadka caadiga ah ama dhinaca degmada Oslo. Way yar yihiin guryaha ay hayaan degmada Oslo, inta ugu badanna waxa la siiyaa dadka dhaqaalahoodu liito ama ay haysato dhibaato bulsho. Dhallinyarada da'doodu u dhaxayso 17 ilaa 23 sano waxa guri degmo (kommunal bolig) siiya xafiiska “Ungbo”. La xidhiidh xaafaddaada si aad u codsato guri degmo. Guryaha ay dadka gaarka ahi kiraynayaan, waxa ogaysiiskooda lagu soo qoraa wargeysyada sida ”Aftenposten” ta galabtii soo baxda iyo ”Internett”ka.

Haddii aad doonayso in aad guri iibsato, waa in aad marka hore lacag kaydsataa oo aad leedahay dakhli joogto ah inta aanad amaah guri qaadan. Amaahda guriga waxa la socda dulsaar (renter), waxana lagu bixiyaa qiyaastii 15 ilaa 20 sano gudahood. Amaahda guryaha waxa laga amaahan karaa bangiyada iyo degmada Oslo labadaba. Faahfaahin dheeraad ah waxad ka helayaa qaybaha af-norwejiga iyo ingiriisida ee bogga www.velkommenoslo.no.

Goobaha xannaanada carruurta (barnehage)

Carruur badan ayaa dalkan Norway tagta goobaha xannaanada carruurta inta aanay bilaabin dugsiga. Marka ay carruurta tagto xannaanada carruurta, waxay ay la ciyaaraan carruuro kale. Waxana ay fursad u helaan in ay bartaan luqada norwejiga. La xidhiidh xaafaddaada si aad uga hesho warbixin ku saabsan goobaha xannaanada carruurta. Marka ay carruurta gaadho lix sano, waa in ay bilaabaan dugsiga.

Caafimaadka iyo xanuunka

Degmada Oslo waxa ku yaalla goobo badan oo aad la xidhiidhi karto haddii aad u baahato wax ku saabsan caafimaad ama aad u baahan tahay caawimo dhakhtar. Waxa intaa dheer oo jiro dhakhtarro badan oo gaar ah. Dhammaan dadka ku nool degmada Oslo waxay xaq u leeyihiin in ay helaan dhakhtar joogto ah oo u gaar ah oo ay isticmaali karaan haddii ay u baahdaan. Dhakhtarkaaga joogtada waxad ka heli kartaa caawimo degdem ah. Dadka magangelyo doonayaasha ah iyo qoysaskoodu waxay heli karaan dhakhtar joogto ah haddii ay xubin ka yihiin xafiiska caymiska dalka (folketrygden). Haddii aanad helin dhakhtar joogto ah, waxa aad la xidhiidhi kartaa xafiiska dhakhtarada joogtada ah

